



Bessemerskolans ordningsregler lå 1819, översatt till Somaliska

2018-08-01

Maamulaha Iskoolka; Eva Aronsson

Sharciga u degsan iskoolka Bessemerskolan 2018/2019

Ku soo dhawaada Iskoolka Bessemerskolan!

Laga bilaabo waqtigaan waxaad ka mid tahay iskoolka bessemerskolan, la shaqaynteeda iyo jawigeeda. Waxaan dooneynaa in qof kasta uu dareemo soo dhaweyn iyo qiimeyn aad u weyn ah. Taasina macneheedu waa in qof kasta oo wax ka barta ama ka shaqeeya iskoolka in gacan uu ku yeesho dareemidda bulshada in iskoolka ay ku soo dhow yihiin. Waxaana loo baahan yahay in la wada shaqeeyo sida loo heli lahaa jawi fiican oo lagu shaqeysan karo waxna lagu baran karo.

Si arintaas loo gaari lahaa iskoolka Bessemerskolan waxay degsatay sharci loona baahan yahay in qof walba uu raaco.

Kaarka lagu magacaabo (passerkort)

Dhamaan ardayda wada dhigato iskoolka Bessemerskolan waxay leeyihiin kaar, kaarku waxaa lagu magacaabaa (passerkort) waana kaar aqoonsi lagu garanayo in aad tahay arday, aadna xaq u leedahay in isloolka aad joogo . Kaarku waxaa loo baahan yahay in ardaygu mar walba u soo qaato iskoolka sida loo ogaado in ardayda uu ka mid yahay, waxaana laga rabaa ardaygu in uu tusin karo kaarka maclimiinta iskoolka, hadii ay dhacdo in la weydiiyo.

Mas'uuliyadda ardayga

Manhajka iskoolka wuxuu ka hadlayaa mas'uuliyadda saaran ardayga iyo sameyntiisa (SKOLFS 2011:144). **Arday hadaad tahay waxaa lagaa filayaa inaad:**

- Kobcinta kartidaada ee ka shaqaynta qaababka dimuqraadi ah.
- In aad diyaar u tahay, si firfircooni ah uga qaybqaadato casharada ka socdo isloolka aadna markaas sida tabartaada aad isticmaasho kartidaada.
- In aad si fiican uga qaybqaadato su'aalaha ku saabsan cilmiga aad baranaysid iyo habka lagu baraayo.
- In aad ka qaybqaadato shirka la qabto ee laga hadlayo isbeddelka ardayga dhanka cilmiyeed iyo shirka lagu soo bandhigaayo talooyinka ardayda iskoolka iyo sidii wax loo wadi lahaa.
- In hadal fiican oo akhlaakh eh lagu hadlo, cay iyo aflagaado lagu hadlin.
- In aad ka war qabtid sharciga u degsan in qof walba si cadaalad ah loola dhaqmo iyo in sharcigaas aad raacdid.
- In aad ka war qabto wax kasta oo tusinaayo cunsurinimo iyo in marwalbo ay mamnuuc tahay.
- In aad raacdo jadwalka u degsan qadada laga bixiyo iskoolka si aysan safafka u dheeraanin.
- In aad isticmaasho weelasha lagu talogalay dib u warshadaynta alaabaha halaabay iyo in aad gaar ahaan gacan ku yeelato sidii iskoolku ku yeelan lahaa jawi wanaagsan uuna ka madax banaanaado halayn iyo wax-jebis.





Bessemerskolans ordningsregler lå 1819, översatt till Somaliska

Xayeysiinta

Dhamaan wixii la halmaana xayeyiin waa in laga idin qaato maamulka iskoolka, waxaana markaas lagu dhejinayaa meelaha banana ee iskoolku u baneeyay waxyaabaha ku saabsan xayeyiinta.

Sharciga u degsan daroogada¹

Ma jiro dulqaad loo dulqaadanayo daroogo iyo wixii la halmaana² waana arin ay isku waafaqsan yihiin iskoolada dhan ee ku yaal degmadda Sandviken. Arinta la rabo in la gaaro waa in iskoolada dhamaantood ee ku yaal degmadda ay ka madax banaanadaan arinta ku saabsan daroogada.

Tubaakada

Tubaakada isticmaalkeeda waa arin ka mamnuuc ah iskoolka iyo dhismihiisa.
Sidaas oo kale lama ogola in iskoolka banaankiisa sigaar lagu afuufo.

Khamriga

Ardaygu uma banaana in uu isticmaalo khamro ama wixii doorsoomid ku ridaayo maskaxda, sidaas oo kale asaga oo khamreysan ma imaan karo iskoolka, waxaana la mid ah meel kasta ay iskoolku mas'uul ka yihiin ardayda.

Daroogada

Wax kasta ay ku jiraan daroogo waa mamnuuc. Isticmaalka daroogada, cirbidda ee daroogada ku jirto ama daawo maskaxda iyo jirka sida daroogada u saameynkarto uusan dhakhtar kuu soo qorin waa mamnuuc, waxaana dhici karto in booliiska baaritaan sameeyo asagoo isticmaalayo eeyaha daroogada hadii qof laga shakiyo.

1 Iskoolku wuxuu leeyahay sharci u degsan sidii looga hor tagi lahaa isticmaalka daroogada.

2 Caddaynta: Daroogada waxaa loola jeedaa khamriga, tubaakada, wixii maskaxda doorsoomid ku rida, Daawo culus uusan dhakhtar kuu soo qorin, cirbid daawo culus xambaarsan la isticmaalo iyo daroogada sanko loo isticmaalo.

Armaajooyinka ardayda

Waa arin aad u muhiim ah in adiga oo arday ah aad ka warqabtid arimahaan:

Armaajooyinka iskooka ardayda ay isticmaalaan waxaa loogu talagalay in ardayda ay ku keydiyaan wixii ay u baahan yihiin sida buugaagta oo kale. Haddii la dareemo ama laga shakiyo in arday ka mid ah ardayda armaajadiisu uu ku kaydinaayo wax iskoolka mamnuuc ka ah sida daroogada oo kale iskoolku wuxuu xaq u leeyahay in uu baaro armaajadaasi. Haddii wax laga helo iskoolku warbixin buu booliiska u bixin doonaa.

Maqnaanshaha/ Soo xaadirinta iyo la xiriirka waalidiinta ardayda aan gaarin 18 sano.

Dhamaan maqnaanshaha ardayga ee iskoolka waxaa loo wargalinayaa iskoolka. Ardayga aan gaarin 18 sano waxaa ka mas'uul ah waalidkiisa. Maqnaanshaha ardayga marka ugu horeysa uu maqnaado sabab la'aan waxaa lala xariirayaa waalidkiisa. Macalinka ardayga baa la xariiraayo waalidka ardayga.





Bessemerskolans ordningsregler lå 1819, översatt till Somaliska

Doorka macalinka

Macallimiintu waa kormeeraha xaalada waxbarasho iyo go'aminta hababka waxbarashada iyo jawiga waxbarashada ka socdo fasalka. Waxaa laga raba in macallinku uu la yeesho ardayda hadal ku saabsan sida arimahaani loo fulin lahaa.

Qaaditaanka alaabta

Macallinku wuxuu xaq u leeyahay in uu ardayga ka qaado alaab, albaataas ardaygu uu isticmaalayo ay dhub u keeneyso waxbarashada ardayda kale ama halis laga yaabo in ay dhaliso.

Foomka jawaabta iyo Sharciga ka degsan Iskoolka

Macluumaadka ku saabsan sharciga iskoolka waxaa loo gudbinayaa ardayga iyo waalidkiisa waxbarashada bilowgeeda. Waxaa laga raba ardayga iyo waalidka ba in ay foomka buuxiyaan markaasina sida ugu dhaqsiga badan ay iskoolka jawaabta u soo celiyaan.

Dukumeentiga Sharciga

Qaybta koowaad: Maxaa dhacaya hadii ardaygu uu sharciga jabiyo?

Qaybta labaad: Caadada Iskoolka iyo sida ay u maamulaan imtixaanada iyo casharada loo baahan yahay in macallinka loo soo celiyo.

bogga iskoolka ee interneedka baad fafaahin ka heli kartaa.

Qiimeynta iyo dib u eegista sharciga

Waxaa loo baahan yahay in maamulaha iskoolka uu ka qaado macallimiinta waxyaabaha ay ku darsan lahaayeen wixii laga beddeli lahaa sharciga u degsan iskoolka iyo wixii la halmaana. Xilliga iskoolka uu dhamaanayo ee waqtiga gu`ga baa arimaha laga hadlay si fiican loo eegayaa.

“ Wadajir baan ku wada shaqaynaynaa ”





Bessemerskolans ordningsregler lå 1819, översatt till Somaliska





Bessemerskolans ordningsregler lå 1819, översatt till Somaliska

Foomka jawaabka ardayga

Sharci-dejinta iskoolka Bessemerskolan

Macluumaad ku saabsan sharciga iskoolka waxaa loo gudbinayaa ardayga iyo waalidkiisa bilowga waxbarashada.

Aniga oo waqtigaan dhigto iskoolka Bessemerskolan, waan ka qayb qaatay, waana fahmay sharciga iskoolka u degsan, waxaana ballan qaadayaa in aan sharciga raaco.

.....
Xaafada aad degan tahay iyo taariikhda

.....
Fasalkaada magaciisa

.....
Nambarka dhalashadaada

.....
Saxiixgaaga

.....
Magacaaga oo dhamaystiran

Aniga oo waalid u ah ardayga dhigta iskoolka Bessemerskolan, waxaan ka qayb qaatay sharciga u degsan iskoolka waana fahmay.

.....
Xaafada aad degan tahay iyo taariikh

.....
Saxiixgaaga

.....
Magacaaga oo dhamaystiran

Foomka waxaa iskoolka loo soo celinayaa iskoolka marka la furo kadib, dhanka boostada ama xafiiska iskoolka

GDPR: Macluumaadka shaqsiyeed waxaa dib u eegaya qolada qaabilsan dugsi-gare, qolada ka mas'uulka ah macluumaadkaaga waa qolada lagu magacaabo xisbiga-cilmiyeed ee degmadda Sandviken. Hadaad faafaahin dharaad aad rabto kuna saabdan macluumaadkaaga waxaad galaysaa www.sandviken.se/gdpr

